



MOVE

Colorado Forward

Ku biir Dhaqdhaqaaqa Gobalka oo Dhan ee Daryeelka Carruurta ee Qiimaha Jaban

Daryeelka carruurta ayaan keliya ahayn cilad haysata qoysaska— waa caqabad dhanka dhaqaalaha ah.

Qoysaska Colorado waxaa caqabad ku noqday nidaamka daryeelka carruurta oo fashilmay. Daryeelka aasaasiga ah waa mid aad qaali u ah ama aan la heli karin gebi ahaanba. Daryeel bixiyaasha ayaan la siin mushaar ku filan. Waalidiinta ayaa cakiran. Ganacsiyada ayaa luminaaya shaqaalaha. Dhaqaalaheena ayaana luminaaya balaayiin lacag ah. Xalka: kala qaybgelidda bulshadaada abaabulka si loogu guuleysto isbadel dhab ah.



Welcome to Move Colorado Forward (MCF, Ku Soo Dhawoow Hormarinta Colorado), oo ah hooyga dadka reer Colorado ee aaminsan in daryeelka carruurta uu aasaasi u yahay dhaqaalaheena iyo qoysaskeena.

MCF waa isbahaysi sii balaaranaaya oo ka kooban u doodeyaal, waalidiin, bixiyaasha daryeelka, hogaamiyaasha ganacsiga, iyo xubnaha bulshada ee heeganka ah oo ka wada shaqeynaayay xal u helidda caqabadaan heer deegaan iyo heer gobal. Ilmo kasta wuxuu u qalmaa biloow awood badan, qoys kasta wuxuu u qalmaa taageero, ganacsi kastana wuxuu istaahilaa inuu ilaashado shaqaalihisa.

Maal gelinta Waxaa baxshaa:



Dhibaataada daryeelka carruurta ayaa saamaynaysa qof kasta oo reer Colorado ah – kama dhigi karno Colorado meel qiimo jaban haddii aanaan xal u helin qiimaha daryeelka carruurta.

Qof kasta wuxuu ku tiirsan yahay qof kaas oo ku sii tiirsan daryeelka carruurta. Tan ayaa qusaysa la shaqeynta qoysaska shaqeeya ee Colorado, ganacsiyada yaryar, shaqaalaha aasaasiga ah, iyo tan ugu muhiimsan—carruurteena.

Qoysaska Ayaan Awoodin Qarashka ama Heli Karin Daryeelka

Inkasta oo aan hormarro waawayn ka samaynay Colorado, gobalkeenu waa mid kamid ah goballada ugu qaalisan wadanka ee ilmo lagu koriyo. Ayadoo taas jirto, bixiyaasha ayaa la dhibaatoonaaya sii wadista ganacsiga iyo sii haysashada shaqaalaha daryeelka carruurta, sabab la xiriirta mushaaraadka hooseeya iyo qiimaha nololaha ee sii kordhaaya.



Qoysasku waxay dhiibaan lacag ka badan **\$20,000+** calaa imo sanad kasta si loo darye elo.



Caqabadda qiimaha daryeelka carruurta ayaa abuurta:

\$2.7 BILYAN

oo qasaare ah oo ku dhacda dhaqaalaheena.

Dhaqaalaheena Ayaa Dhibaataysan

In aan la heli karin daryeelka carruurta oo qiimo jaban ayaa qoysaska ku qasbaysa inay iskaga tagaan shaqooyinkooda iyo dib u dhacyada xirfaddaha. Ganacsiyada ayaa la daalaa dhacaaya joogteynta shaqaalahooda.

Ilmaheena ayaa Dib u Dhacaaya

Ilmaheena ayaan helin fursadda helitaanka waxbarashada dhalaanka ee tayada sare leh sanadaha u dhexeeya 0-3, kuwaas oo ah ugu muhiimsan kobaca bulshada, shucuurta, iyo maskaxda



\$1 kasta oo lagu maal geliyo daryeelka carruurta ayaa keenaysa **\$10-13 OO AH ROI** oo lagu celiyo dhaqaalaha

Tan ayaa Qusaysa Adiga iyo Bulshadeena-Nagu Soo Biir Maanta.

Soo degso Empower App—aalad awood badan oo kaa caawinaysa abaabulka bulshadaada iyo in aad isbadel ka abuurto aasaaska hoose.

Halkaan iskaan garee si aad u soo degsato oo adeegso koodhka casuumaada: [movecoforward](https://movecoforward.com)





MOVE

Colorado Forward

U doodeyaashu waxay aad ugu dagaalameen xal u helidda dhibaataada daryeelka carruurta ee Colorado—waxaan ka shaqeynaysaa abuurista xalal waara. Isbadelladu waxay ku bilowdaan wacyi gelin, wacyi gelintuna adiga

Nagu soo biir si u xoojino hormarka isbadelka

Ku soo biir bulsho sii kordhaysa oo qaadaysa talaabo — oo ogoow in dad dhab ah halkaan u joogaan in ay ku taageeraan. Aan isla dhisno wax awood badan. Halkaan ka bilow.

1

Halkaan kasoo degso Empower: <https://empowerthefuture.us/movecoforward> and use invite code: movecoforward.

2

Soo geli xiriiradaada (waxay ahaan doonaan kuwo kuu gaar ah).

3

Waafaji liiskaaga oo bilow qaadista talaabada.

4

Nala wadaag qisadaada. Nagu soo xir saaxiib. Taageer dedaallada codbixinta maxaliga ah ee dhacaaya dayrtaan.


5

Sii wad ka qaybgalka inta dhaqdhaqaaqu sii balaaranaayo. Diiwaan garee hawlahaaga si aad noogu xirnaato oo aad nooga caawiso inaan hormarno oo sii xooqaysano — ayadoo bulshadu ku taageerayso talaabo kasta oo aad horey u qaado.

Move Colorado Forward waxay abaabulaysaa:



In daryeelka laga dhigo mid qiimo jaban oo ay heli karaan qoysasku.



In la xaqiijiyo in ay helaan mushaar noloshooda deeqa bixiyaasha iyo macalimiintu.



In la dhiso maal gelin xasiloon oo bixiyaasha iyo bulshooyinku ay isku halayn karaan.



In la taageero xalalka ay dadka deegaanku hagayaan si loo taageero qoysaska gobalka oo dhan.

Isbadelka Gobalka oo dhan ayaa ka bilaabanaaya heer deegaan—ayadoo la adeegsanaayo dedaallada sida Soojeedinta 7A ee mashruuca Roaring Fork Valley's Strong Start, ol-olaha Mutaqbal Ifaaya iyo Qodobka Ol-olaha 1B Si looga Caawiyo Ubadka Larimer inay Hormar Gaaraan, oo labadaba lagu daraayo codbixinta Nufeembar 2025. Guulahaan ayaa abuuraya horukac oo hagaaya xeeladaha lagu gaaraayo guulaha mustaqbalka ee gobalka oo dhan.

Qoysaska Colorado waxay Diyaar u Yihiin Talaabo

84%



waxaysheegayaan in gobalka ay tahay inuu hawl badan ka qabto ka

69%



waxay taageerayaan maal gelinta dawlada si loo

Isha: Xog Uruurinta Fikradaha Dadwaynaha ee



Ma u baahan tahay in lagaa Caawiyo Bilowga? La xiriir Sophie Mariam, Agaasimaha Iskaashiga iyo Abaabulka oo aad ka helayso sophie@movecoforward.com